

Qoysaska qaaliga ah,

HWDSB haddii aanu nahay waxaanu aqoonsanahay in ilaalinta xuquuqul insaanka ay tahay qayb muhiim ah oo ka mid ah himiladeena si aan ugu boorinno ardayda inay wax u bartaan oo ay kor ugu qadaan awoodooda si buuxda aduunyadan kala duwan. Annagoo horumarinayna siyaasada xuquuqul insaanka, waxaan hiigsaneynaa inaan ka caawino qof walba inuu fahmo xuquuqdoodiisa, doorkiisa iyo mas'uuliyadaha uu ku leeyihiin waxbarashada ee HWDSB iyo goobaha shaqada. Siyaasadda xuquuqul insaanku waxay u adeegi doontaa si gundhig u ah siyaasadaha la xiriira waxayna sii kordhin doontaa ka go'naanta HWDSB ee kobcinta iyo ilaalinta dhaqamada ixtiraamka, sinnaanta, iyo soo dhawaynta, oo ka madax banaan takoorka iyo dulmiga.

Xubnaha bulshada ee HWDSB, oo ay ku jiraan ardayda, qoysaska iyo shaqaalaha, ayaa lagu martiqaaday inay ka qaybqaataan horumarinta siyaasadda xuquuqul insaanka ee HWDSB iyadoo:

- Buuxinta Sahanka [Human Rights Policy Survey](#) – furan ilaa Janaayo 5, 2022
- Wadaagista jawaabahooda qoraal, maqal ama muuqaal ah ee su'aalaha Siyaasadda Xuquuqul Insaanka iyagoo email ugu diraya [humanrights@hwdsb.on.ca](mailto:humanrights@hwdsb.on.ca)
- Wadaagista khibradahaaga si qarsoodi ah iyada oo loo marayo tan [anonymous form](#).
- Ka-qaybgalka hawl-wadaag iyo fadhi dhegaysi dhex-dhexaad ah inta u dhaxaysa Noofembar 24 iyo Diisembar 16, 2021. Isdiwaangeli adiga oo dooranaya isku xirka diiwaangelinta kooxda kugu habboon ee hoose:
- [Student Registration](#)
- [Family/Community Member Registration](#)
- [Staff Registration](#)

Waxaa naga go'an inaan horumarino siyaasad ka tarjumaysa codadka bulshooyinka aan u adeegno, gaar ahaan kuwa inta badan la kulma takoorid. Dhammaan xubnaha bulshada HWDSB (ardayda, waalidiinta, daryeelayaasha, mas'uuliyiinta, shaqaalaha, tabaruceyaasha, la-hawlgalayaasha bulshada iyo xubnaha bulshada) waxaa lagu casuumay inay wadaagaan aragtidooda si ay ugu wargeliyaan siyaasadda iyo nidaamka xuquuqul insaanka.

Si aad wax badan uga barato Siyaasadda Xuquuqul Insaanka, booqo [hwdsb.on.ca/human-rights-policy](http://hwdsb.on.ca/human-rights-policy).